



ismaamulka san diego



qashinka xayawaanka rabaayada ah

Aan Kuligeen Qaadano Doorkeena!

Inta badan dadka deegaanka ayaa walaac ka qaba nadiifinta marinnadeena biyaha. Xaqiiqdii, xog aruurino laga sameeyay Ismaamulka San Diego ayaa muujinaaya in **ka badan 50% dadka deegaanku ay** aaminsan yihiin in wasaqda gasha balida, harooyinka, iyo xeebaha ay si toos ah u saamayso ayaga iyo qoysaskooda.

Diyaar ayaan u nahay Inaan ku Caawino.

Qashinka xayawaanka rabaayada ah waxaa ku jira bakteeriyyada, shilinta, iyo fayrasyada sumayn kara biyaheena. Haddii qashinka xayawaanka rabaayada ah aan la gurin wuxuu geli karaa biyaha daadka kadibna wuxuu tagi karaa marinnada biyaheena taasoo keenaysa xanuunno ku dhaca dadka. Barnaamijka **Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ka taageeraaya dadka deegaanka dedaaladooda kahortaga wasaqda biyaha asagoo siinaaya **tilmaamahaan muhiimka ah ee ka hortaga in wasaqda xayawaanka rabaayada ah gasho biyaha daadka.**



Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka raabka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, io badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.

Maxaad Samayn Kartaa Si aad U ilaalso Nadaafada Biyaheena?

- Marka aad socod u baxayso, **aruuri xaarka xayawaankaaga.**
- **Qaado baco dheeraad ah** marka aad lugaysiinayso xayawaankaaga rabaayada ah, kadibna ku rid qashinka.
- Ardaagaga danbe, **ka aruuri qashinka xayawaanka rabaayada ah ugu yaraan halmar asbuucii**
- **Markasta ku rid qashinka xayawaanka rabaayada ah ee bacda ku jira** qasaca qashinka ama godka qashinka!

**Waad ku mahadsan
tahay inaad doorkaaga
ka qaadatay difaacida
kanaaladeena biyaha.**

Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah.

1-888-846-0800

watersheds@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater